



SOMALI

Mudane Dijjon DaCosta Sr., Guddoona Guddiga  
Marwo Deirdre P. Pierce, Guddoomiye Ku xigeenka  
Marwo Anna Hill  
Marwo Whitney McGinniss  
Marwo Allyson Gevertz  
Marwo Vickie B. Turner  
Dhaqtar Joyce Morley

Dhaqtar Devon Q. Horton, Kormeeraha guud

08 September 2023

Bulshada Qaaliga ah ee Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb,

Waxaan aad uga xummahay inaan mar labaad kuu soo qoro isbuucaan, anigoo xambaarsan war murugo leh oo ku saabsan qasaare kaloo ba'an oo ka dhex jirta bulshada dugsigeena. Horaantii, waxaan u baroor diiqnay geerida lama filaanka aheyd ee sadex arday oo dhigata Dugsiga Sare ee Lakeside sababtoo ah shil baabuur oo naxdin leh. Hadda, waxaan wajaheynaa qasaaraha ardayga da'da yar ee Dugsiga Hoose Rock Chapel taasoo ay ugu wakan tahay dhacdo ku lug leh hub aan illaalsaneyn.

Qasaarooyinkaan waxay ku dhafteen xudunta muhiimka u ah dadnimadeena aan wadaagno, oo kaliya waa abiici ah in la dareemo calool xumo. Sida Degmo ahaan, waxaan sii wadeynaa inaan uga tacsiyadeyno oo taageero hiil iyo hooba aan la garab joogsano qoysaska iyo qaraabadii ay ka baxeen dadkii dhawaan naga baxay. Aabe ahaan, waxaan sii joogteynayaa inaan qalbigeyga iyo docodeyda ku haayo, anoo rajeynaya in bogsashada ay si un uga dhex dhalato masiiboo yinkan aan la qiyaasi karin.

Maahmaah Kuuriyaan ah ayaa ka hadleysa waqtiyadaan oo kale: "*Markii uu canug dhinto, waxaad ku duugeysaa canuga qalbigaaga abid.*" Ardayda naga baxday isbuucaan ayaa marwalba ka qeyb noqonayo taariqda qaniga ah ee Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb. Inta aan ku jirno midnimadeena iyo adkeysigeena, waxaan heli doonaa siyaabo aan ku sharafno xasuusta ruuxyadaan qaaliga ah ee naga tagay, inagoo hubineyna in dhaxalkooda uu ku noolaado kartida aan kala helno.

Ku socota ardayda iyo shaqaalaha Dugsiga hoose Rock Chapel iyo Dugsiyada Sare ee Lakeside, fadlan ogaada inaan halkaan idin sii joogeyno. Murugada waa safar shaqsiyed oo xoogan, oo waxaa naga go'an inaan bixinno taageerada lagama maarmaanka u ah bogsashadaada. Inta lagu jiro isbuucaan, taqasuska murugada ayaa si aan daal laheyn oo dhiironaan leh kaaga caawinayo adeegyada la talinta iyo taageerada, kuwaas oo sii soconayo haddiiba loo baahdo.

Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb waa bulsho isku xiran oo ka kooban 92,000 arday, 14,000 shaqaale ah, xubnaha qoyska oo aan tiro laheyn, iyo daneeyayaasha. Waxaan u barooranaa markii ay musiibo dhacdo sababtoo ah waxaan nahay bulsho ku sifoobay naxariista daacad ah iyo wanaagsan. Si wadajir ah, waxaan u sharfeynnaa kuwa aan jacelnahay ee naga tagay inagoo siineyno naxariisteena dhabta ah, taageero aan leexleexad laheyn, iyo hagitaan naxariis leh.

Waxaan kugu dhiirogelinayaa inaad ogeysiiso kuwa aad jaceshahay sida aad u dareemeyso iyaga marar badan. Waan ogahahay waan sameynayaa.

Iyo dareen qoto dheer iyo taageero aan leexleexad laheyn,

Dhaqtar Devon Q. Horton, Kormeeraha guud  
Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb